

Bostarka Khidmadaha Dugsiga Qoysaska Ardayda ku jirta Darajooyinka 7-12



WAA LA HELI KARAA KAALMO HADDII AADAN AWOODIN IN AAD BIXISID KHIDMADAHA DUGSIGA.

Sharciga gobolka ayaa raba in la hubiyo in ardayga ay waalidiintiisa awoodin in ay bixiyian khidmadda in uu heli karo ka-dhaafidda khidmadda ama qodobo kale oo lagu baddalo ka-dhaafidda khidmadda.

DHAMAAN KHIDMADAHA DUGSIGA WAXAY HOOS YIMAADAAN KA-DHAAFID.

YAA XAQ U LEH KA DHAARO KHIDMADAHA?

Waxaa dhici karto in ardayga uu xaq u yeesho in laga dhafo khidmadaha haddii MID ka mid ah kuwa soo socdo lagu dabaqo:*

- marka qoyska ardayga qaato TANF/SNAP (*kuboonka raashinka ama Brograamka Shaqada Qoyska Gobolka (State Family Employment Program)(Supplemental Nutrition Assistance Program)*)
- marka ardayga qaato SSI (*Dakhliga Sekuritiga Dheeraadka (Supplemental Security Income)*)
- ardayga ayaa loo qoondeeyay McKinney-Vento
- marka ardayga ku jiro daryeelka qof kale
- marka ardayga ku jiro xabsiga gobolka
- marka ardayga uu xaq u yeesho taasoo ku saleysan dakhliga qoyska/reerka (*heerarka waafaqsan yahiin xaq u yeelashada qadada lacag la'aanta*)

**Ardayga wuxuu kaloo xaq u yeelan karaa ka-dhaafidda khidmadda haddii uusan la kulmin mid ka mid ah heerarkan balse uusan weli bixin karin khidmadda. Fadlan tag dugsiga ama fiir siyaasadda dagmada si aad u heshid macluumaad badan.*

SIDEEN KU DALBAN KARNA KA-DHAAFIDDA KHIDMADAHA?

Ardayga ama waalidka ayaa dalban kara ka-dhaafidda khidmadaha:

- marka ay buuxiyaan arjiga ka-dhaafidda khidmadda
- marka ay dugsiga u gudbiyaan arji buuxa
- marka ay keenaan warqadaha xaq u yeelashada ka-dhaafidda khidmadaha (*Fiiri Arjiga Ka-Dhaafidda Khidmadda*) si aad u heshid warqadaha loo baahan yahay)

Sharriga gobolka wuxuu raba in dugsiyada ay xaqiijiyaan xaq u yeelashada ka-dhaafidda khidmadda. Dugsiga wuxuu diiwaanka gelin doonaa warqadaha xaq u yeelashada soo gaaray iyo haddii ay la kulmaan sharuudaha xaq u yeelashada kaddibna ardayga waxaa loo dirri doonaa foomka Go'aanka iyo Racfaanka (Decision and Appeals form). Kaddib marka la diiwaan geliyo, koobiyada warqadaha xaq u yeelashada laguma hayn doono faylka dugsiga.

SIDEE AYAY KA-DHAAFIDDA U SAAMAYN DOONTAA KA-QEYBGALKA ARDAYGA HAWLAHA DUGSIGA?

Haddii ardayga uu xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda, **waa in laga dhafo DHAMAAN khidmadaha.** Tan waxaa ka mid ah khidmadaha diiwaan gelinta, buugaagta, fasalada, isboortiga, naadiyada, kooxaha ku-celcelinta, safarada, khidmadaha albaabka, labbiska, kaararka hawlaha, lokarada, hawlaha ka baxsan manhajka, xerooyinka kooxda kuleylaha, iwm.

Haddii ardayga uu xaq u yeesho ka-dhaafidda khidmadda, dugsiga kama rabo ardaygaas in uu shaqeyo baddalkii uu qaadan lahaa ka-dhaafid, ama weydiisan lahaa in uu kis-kis u bixiyo khidmadda.

Lama ogola in dugsiga uu ka-dhaafidda khidmadda ardayga la wadaago qof aan u baahneyn in uu ogaado.

Lama ogola in dugsiga aruuriyo lacag, yareeyo, ama ceshto darajooyinka, ama reebto shahaadooyinka, diiwaanada dugsiga, jadwalada fasalka ama ka-qeybgalka inta uu socdo maalin dugsiiyeedka si loo hirgeliyo bixinta kharashka dugsiga.

Si aad u ogaatid in badan, la xariir dugsiga ardaygaada, booqo bogga internetka dugsigaada, ama booqo bogga internetka khidmadaha dugsiga gobolka (<https://schools.utah.gov/schoolfees>).

Su'aalaha, Faalada, ama Arrimaha? La xariir kooxda khidmadaha dugsiga gobolka schoolfees@schools.utah.gov.



Utah State Board of Education School Fees Team

Revised February 2023
ADA Compliant 2/14/2023